IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 3aad** Mugdisho 14 Oktoobar 1975 **L. 1 R. 10**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريده شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

SHARCI L. 54 ee 1 Jenayo 1975 — *Habeynta Sharciyada u degsan Furdiiyinka, Ganacsiga iyo lacagta iyo ku wareejinta dacwado ama dembiyo Maxkamadda Bad. Dalka.* Bog. 747

SHARCI L. 55 ee 4 Oktoobar 1975 — *Sharci ku saabsan Guddi gaar ah oo dhameeynaya Dacwadaha dhaxalka.* » 752

SHARCI L. 56 ee 5 Oktoobar 1975 — *Nidaaminta Maaliyadda Wakaaladaha Dawladda.* » 754

## BOGGA LABAAD

### XEER

W. M.

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 18 Oktoobar 1975 — *Lumid Buugga lacagta L. 6783, Sh. So. 14.000 u leyahay Jaalle Maxamed Caddow Raage. (209)* Bog. 756

Madbaqadda Dawladda — Muqdisho

# BOGGA KOWAAD

**SHARCI L. 54 ee 1 Jenayo 1975.**

**Hobeynta sharciayda u degsan Furdooyinka Ganacsiga, Dhaqaalaha iyo Lacagta, iyo ku woreejin dacwado ama dembiyo Maxkamadda Bad. Dalka.**

---

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda 1aa iyo tan 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciyada iyo Xeerarka lagu disay Maxkamadda Badbaadad Dalka iyo Maxkamadda Gobollada ee Caadiga ah;

MARKUU ARKAY Sharciyada lam. kala yihiin 1 ee 31-3-196 Furdooyinka, Sharci lam. 12 ee 26-9-1964 ee Ganacsiga Dibedda, Dhaqalaha iyo Lacagta adag iyo Xeerarka la xiriira, sharci lam. 12 ee1-8-1966 Ilaalinta Canshuuraha, Sharci lam. 54 ee 10-9-1970 ee Dhawritaanka Badbaadada Ummadda;

MARKEY U MUUQATAY Baahida weyn ee loo qabo in toos loo habeeyo Sharciyada iyo Xeerarka loogu danaynayo daryeelka dhaqaalaha Dalka;

MARKUU AIXGELIYEY Inay tahay lagama maarmaan in la kala xadeeyo awoodda Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo kuwa caadiga ah ee Gobollada, xagga dembiyada laga galo maaliyadda iyo dhaqaalaha;

MARKUU TIXGELIYEY Iney habboontahay in lagu soo wareejiyo awoodda Maxkamadda Badbaadada Dalka dembiyada hoos laga soo sheegi doono ee Xeerka Ciqaabta;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1. Haddii qodoba ka mid ah Sharcigaan uusan gaar ahaan u sheegin, dembiyada qodobbada sharcigan ku tilmaaman waxaa awood u leh in ay gartiisa qaaddo go'aanna ka gaadho, Maxkamadda Badbaadada Dalka.

Qodobka 2aad

2. Qof kasta oo Kontrabaan ka dhoofiya ama soo geliya Waddanka amaba isku daya inuu dhoofiyo ama soo geliyo badeeco nooc kasta oo furdo ha noqotee (merce doganale) ama xoolo iyo wixii ka soo baxa, isagoo ujeeddadiisu tahay inuu canshuurta dawladda kala dhuunto, haddii qiimaha badeecadduu gaarayso Sh. So. 10.000 (toban kun) oo shilin iyo wixii ka badan wuxuu gelayaa dembi ciqaabtiisuna waa tan hoos ku koran:

B) — Sh. So. 10.000 ilaa 50.000 (toban kun ilaa konton kun) oo shilin:
— 5 ilaa 10 sano oo xarig ah iyo;
— ciqaab lacageed oo ah 3 ilaa 10 jeer canshuurtii baxsatay.

T) — Sh. So. 51.000 (konton iyo kow kun) ilaa Sh. So. 100.000 (boqol kun):
— 10 ilaa 20 sano oo xarig ah iyo
— ciqaab lacageed oo ah 5 ilaa 15 jeer canshuurtii baxsatay.

J) — Sh. So. 100.000 (boqol kun) wixii ka sarreya.
1. — Xarig ka bilawda 15 sano ilaa 30 sano iyo
— ciqaab lacageed oo ah 10 ilaa 20 jeer canshuurtii baxsatay.

2. — Xabsi daa'in haddii: ay jireen waxyaalaha dambiga cusleeya (circostanze aggravanti)
— ciqaab lacageed oo ah 10 ilaa 25 jeer canshuurtii baxsatay.

3. — Dil haddii ay meesha soo gasho ujeeddo wax lagu yeelayo oo la isku hortaagaayo kobcinta dhaqaalaha Dalka.

Qodobka 3aad

1. Qof kasta oo Kontrobaan ka dhoofiya ama soo geliya Waddanka amaba isku daya inuu ka dhoofiyo ama ku soo geliyo lacag Soomaali ah ama shisheeyey (adag), Dahab, ama dhagax qiima leh. haddii qimahoodu gaaro ama u dhigmo Sh. So. 5.000 (shan kun) oo shilin iyo wixii ka badan, wuxuu gelayaa dembi ciqaabtiisu tahay:

B) — Sh. So. 5.000 — ilaa 50.000 (dhan kun) — (konton kun) oo shilin:
— 5 ilaa 10 sano oo xarig ah iyo
— Ciqaab lacageed oo ah 3 ilaa 10 jeer qiimaha ama tirada lacagta.

T) — Sh. So. 51.000 (konton iyo koow kun) oo shilin ama qiimaha u dhigma iyo wixii ka badan oo aan gaareyn Sh. So. 100.000 (Boqol kun) oo shilin:
— 10 ilaa 20 sano oo xarig ah iyo
— Ciqaab lacageed oo ah 5 ilaa 15 jeer qiimaha ama tirada lacagta..

J) — Sh. So. 100.000 — (boqol kun) oo shilin wixii ka sareeya:
1. — Xarig ka bilawda 15 sano ilaa 30 sano oo xarig ah iyo:
— Ciqaab lacageed oo ah 10 ilaa 20 jeer qiimaha ama tirada lacagta;

2. — Xabsi daa'in haddii ay jiraan waxyaabaha dembiga cusleeya iyo

— Ciqaab lacageed oo ah 10 ilaa 25 jee qiimaha ama tirada lacagta;

3. — Dil haddii ay meesha soo gasho ujeeddo wax lagu yeelaayo oo la isku hortaagaayo kobcinta dhaqaalaha Dalka.

Qodobka 4aad

1. Gaadiidka lagu qabto isagoo sida Koontrabaan keli ah, ama laga helo lacag, dhagax qiima leh iyo dahab oo qiimahoodu u dhigmo tan Gaadiidka, haddii uu caddeyn kari waayo qofka Gaadiidka lehi in uusan xogogaal u ahayn Koontrabaanka, Gaadiidka waa laga dhacayaa.

Qodobka 5aad

1. Qof kasta oo Soomaali ah, shisheeye Waddanka deggan oo la yeesha xiriir kanacsi isagoo u dhoofinaaya ama ka keenaaya toos ama dadab, badeeco, waddan u ah Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed cadaw, ama dagaal cad kula jira, wuxuu galayaa dembi ciqaabtiisu tahay 5 sano oo xarig ah ilaa Dil.

2. Markasta oo go,aan laga gaaraayo ciqaabaha qodobkan ku tilmaaman, waxaa la raaci doonaa habka ay qoraayaan qod. 2aad iyo kan 3aad ee sharcigaan.

Qodobka 6aad

1. Qof kasta oo si khiyaano cad ama qarsoon ah uruursaday lacag adag (valuta pregiata) oo Waddanka soo gashay isagoo ujeeddadiisu inuu ka faa'iidaysto si toos ah ama dadban, wuxuu galayaa dembi ciqaabtiisu tahay 5 ilaa 15 sano oo xarig ah iyo ciqaab lacageed oo ah Sh. So. 10.000 ilaa 50.000 (toban kun konton kun) oo shilin.

2. Waxaa isla ciqaabtaas mutaysanaya qof kasta oo toos ama dadab lug ugu yeesha, caawiya, ama suurageliya dembiga xubinta kor lagu xusay.

3. Haddii dembigaas lagu galo tabaabulsho habeysan (in maniera organizzata), iyadoo ujeeddadu tahay in faa'iido gaar ahaaneed laga gaaro, isla markaana ay ka dhalan karto waxyeelo curyaamin kara dhaqaalaha guud ee Waddanka, ciqaabtu waxay noqonaysaa, xarig adag oo 20 sano ah ilaa xabsi daa'in iyo ciqaab lacageed oo ah Sh. So. 50.000 ilaa 100.000 (konton kun - boqol kun) oo shilin.

Qodobka 7aad

1. Sarkaalka loo xilsaaray uruurinta iyo ilaalinta canshuuraha furdooyinka ama berriga, oo laaluush, eex iyo gobolleysi awgeed fududeya ama suuragal ka dhiga in ay baaqato Dakhli canshuur Dawladeed wuxuu galayaa dembi ciqaabtiisu tahay:

— xarig gaaraya 5 ilaa 15 sano, iyo;
— ciqaab alcageed oo ah Sh. So. 5.000 ilaa 10.000 (shan kun ilaa toban kun) oo shilin;

— iyo canshuurtii baaqatay oo uu soo celiyo.

2. Haddii dembiga lagu xusay xubinta 1aad ee qodobka, lagu galo si taxadir la'aan ah (negligenza), ciqaabtu waxay noqoneysa:

— xarig adag oo gaaraya 1 (hal) ilaa 3 sano; ama

— ciqaab lacageed oo ah Sh. So. 1.000 ilaa 5.000; iyo

— canshuurtii baaqatay oo uu soo celiyo.

Qodobka 8aad

1. Eedeysanaha loo heysto badeeco Kontrabaan ah oo qiimahoodu uusan gaareyn Sh. So. 10.000 (toban kun) ama Dahab, dhagax qiima leh iyo lacag Soomaali ama shisheeye oo qiimahoodu ama tiradoodu ay ka yar tahay Sh. So. 5.000 (shan kun) wuaxuu galayaa Kontrabaan fudud oo ay awood u leedahay Maxkamadda caadiga ah oo Gobollada, ciqaabtiisuna waa:

b) ilaa 2 sano oo xarig ah, iyo ciqaab lacageed oo ah 3 ilaa 10 jeer oo ah canshuurtii baxsatay, qiimaha dahabka, dhagaxa qiimaha lch, ama tirada lacagta.

Qodobka 9aad

1. Sida uu qabo qodobka 19aad ee sharciga lam. 12 ee 1-8-1966, qofka loo haysto dembiga lagu xusay qodobka 8aad ee sharcigan, waxuu awood u leeyahay inuu dacwadiisa ku dhameysto heshiis maamul lacageed ah muddada 15ka casho ah ee sharcigu caymay, Haddu-usan hadda ka hor dembiga noocaasa ah gelin (recidivo).

Qodobka 10aad

1. Badeecadda, lacagta, dahabka dhagaxa, qiimaha leh iyo qalabka dembiga lagu galay (corpo di reato) markasta waa laga dhacayaa eedeysanaha, khasnadda Dawladda ayaana lagu xereynayaa faa'iidada ka soo baxda.

Qodobka 11aad

1. Qof kasta oo ciqaab xarig ah loogu xukumay Kontrabaan awgiis, dembiga Kontrabaankuna yahay kii ugu horeeyay, hadduusan xarigu ku badneyn 20 sano, wuxuu awood u leeyahay inuu muddada xabsiga ah lacag ku beddesho, sida u qabo sharcigu.

Qodobka 12aad

Waxaa loo wareejiyey awoodda Maxkamadada Badbaadada Dalka qaadista dacwadaha ku xusan qodobbada laga bilaabo 348 ilaa 354, laga bilaabo 360 ilaa 371 ee Xeerka Ciqaata.

Qodobka 13aad

Dembiyada Sharciganu ka hadlaayo, haddii aan go'aan kama dambeys ah weli laga gaarin, waxaa loo wareejinayaa Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobolka ay ka socoto dacwaddu.

Qodobka 14aad

1. Waa la baabi'yey sharci kasta oo sharcigan ka soo horjeeda ama aan la socon karin.

Qodobka 15aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka.

Muqdisho, 1 Jenayo 1975.

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

SHARCI L. 55 ee 4 Oktoobar, 1975.

Sharci ku saabsan Guddi gaar ah oo dhammeynaya dacwodaha dhaxalka.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka.

ISAGOO AQOONSAN In ey lagama maarman tahay in la dhiso Guddi gaar ah oo la siiyey awood Maxamadeed, hawshiisuna ey tahay inuu si degdeg ah u dhammeeyo dacwadaha dhaxalka oo ku daahay Maxkamadaha hortooda si loo gaaro caddaalad ijtimaaci ah.

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan oXghayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA
Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la dhisayaa Guddi gaar ah oo la siiyey awood Maxkamadeed oo ey hawshiisu tahay inuu si degdeg ah u dhammeeyo dacwadaha ku saabsan dhaxalka oo hor yaalla Maxkamadaha caadiga ah daraja kasta ha ahaadeene ama Guddiga Cadaaladda iyo Sharciga ee G.S.K. kana soconayey ugu yaraan 2 sano iyo wixii ka badan.

2. Guddigaasu wuxuu ka kooban yahay 7 qof oo kala ah sida hoos ku qoran:

a) 3 Garsoore oo u midkood ka noqonayo Guddoomiyaha Guddiga.
b) 3 Garsoore Dadweyne oo uu magacaabo Xafiiska Siyaasadda ee M.G.S.K.

t) 1 Injiineer oo ey magacaawdo Wasaaradda Hawlaha Guud.

3. Magacyada xubnaha Guddiga waxaa lagu soo saarayaa Dekreeto u saxiixo Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 2aad

*Awood*

1. Guddigu wuxuu leeyahay awoodda ey leedahay Maxkamad madani ah. Wuxuuna u yeeri karaa qof kasta oo u baahdo, baarina karaa qoraal kasta oo lug ku leh dacwadaha uu qaadayo. Go'aannada Guddiga waxey la mid yihiin kuwa ey soo saaraan Maxkamadaha.

2. Xubnaha uGddiga intay hawshooda wadayaan waxay leeyihiin awoodda shaqada iyo sharafta uu leeyahay Garsooraha Dawladda.

Qodobka 3aad

*Habka dacwad qaadista*

Guddigu markuu dacwad qaadayo wuxuu raacayaa Xeerarka mada niga ah.

Qodobka 4aad

*Muddada uu shaqeynayo Guddiga*

1. Guddigu hawshiisa wuxuu bilaabayaa 1-11-1975.

2. Awoodda iyo jiritaanka Guddiga waxey ku ektahay hal sano oo laga bilaabo taariikhda kor lagu sheegay. Guddiga waa inuu hawsha loo xislaaray ku dhammeeyaa sannadkaas.

3. Muddadaas xubnaha Guddiga hawl kale looma diri karo.

Qodobka 5aad

*Go'aannada iyo fulintooda*

1. Guddiga oo dhan ayaa go'aan ka gaaraya dacwadaha loo xilsaaray.

2. Go'aannada u gaaro Guddigu waa kama dambeys.

3. Guddiga waxaa loo xilsaaray inuu fuliyo go'aannadiisa muddada lagu tilmaamay qoobka 4aad ee sharcigan.

Qodobka 6aad

*Ajuurada*

Haddii ajuurada dacwadda lagu bixiyey Maxkamadaha caadiga ah wax juura ah ee dhinacyada laga qaadayo ma jiraan.

Qodobka 7aad

*Xarunta Guddiga*

Guddiga wuxuu dacwadaha ku qaadayaa Xamar, hase yeeshe haddii loo baahdo wuxuu aadi karaa Gobollada iyo Degmooyinka oo u ku soo qaadi karaa dacwooyinka loo xilsaaray.

Qodobka 8aad

*Tirtirid*

Waxaa la tirtirayaa sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharciga kan.

Qodobka 9aad

*Dhaqan gelid*

Sharciga kan wuxuu dhaqan galayaa si degdeg ah, waxaana lagu soo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4 Oktoobar, 1975.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

SHARCI L. 56 ee 5 Oktoobar, 1975.
Nidaamjnta Maaliyadda Wokaaladaha Dawladda.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Warqadda kowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELINAYA Hantiwadaageynta dhismaha dhaqaalaha ee Dalka;

ISAGOO TIXGELINAYA Waaya-aragnimada laga helay sanooyinkii hore ee Kacaanka iyo dhibaatooyinkii ka soo baxay wada shaqeyntii. Wakaaladaha iyo Bankiya markii la tixgeliyo waajibaadka Kacaanka inuu toosiyo had walbaba maamulkii aan la socon karin mabaadida siyaasadda, dhaqaalaha iyo dhismaha bulshada;

ISAGOO TIXGELINAYA Go' aankii Golaha Sar eee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharcigaan:

Qodobka 1aad

1. In Bankiyadu bixiyaan wixii deyn ah ee Wakaaladuhu kala qabaan dhexdooda;

2. In Bankiyadu bixiyaan wixii deyn ah ee Wakaaladuhu ka qabaan xubnaha kale ee Dawladda.

Qodobka 2aad

1. In Dawladdu bixiso wixii deyn ah ee Wakaaladuhu ku leeyhiin Wasaaradaha;

2. Markii Dawladdu goosato in badeeco ama alaab lagu gado sicir ka yar isku bixin lahayd, mas'uuliyadda sicirkabka waxaa qaadaya Dawladda ayadoo qorsheyneysa isla markaas habka loo gudayo;

3. In Dawladdu bixiso wixii sicirkab ah oo ka yimid go'aanno hor uga soo baxay labada Gole.

Qodobka 3aad

1. Bankiga Dhexe ee Soomaaliya wuxuu kala wareegayaa Bankiga Ganacsiga Ummadda wixii deyn iyo dulsaar ah oo Wakaaladuhu ka qabaan Bankigaas oo la xiriira maalgelin (investment).

2. Lacagtaas maalgelinta ah ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliya uu kala soo wareegey Bankiga Ganacsiga Ummadda waxay ahaanaysaa deyn Wakaaladuhu ku gudaan muddo toban sano ah, dulsaarkiisuna yahay 2,50% sannadkii, una noqonaya Raasumaal Wakaalad kasta.

Qodobka 4aad

Baahida dambe oo timaada oo ku soobsan shaqada agnacsiga Wakaaladaha waxaa xad lama dhaafaan ah u samayn doona, si xeer ah, wadajir, Wasaaradda Maaliyadda iyo Bankiyada, ayagoo tixgelinaaya talada Guddiga Dhaqaalaha, Wasaaradda Ganacsiga iyo Madaxda Wakaaladaha.

Qodobka 5aad

1. Wasaaradda Maaliyadda iyo Bankiyada waxaa waajib ku ah ah inay mudda lix bilood ah, marka laga bilaabo dhaqangalka sharcigaan, ku sameeyaan Xeer Xisaabeed iyo diiwaangelin guud.

2. Bankiyadu waxay xaq u leeyihiin inay baaraan dhaqaalaha iyo xisaabaadka Wakaaladaha deynka ka qaba, si ay u hubsadaan in maamulkkii Wakaaladuhu u socdo si waafaqsan sharcigaan iyo amaahda ay bixiyeen inay ku fadhido sal dhaqaale.

Qodobka 6aad

1. Wasaaradaha iyo Wakaaladuhu waa inay wax ku kala iibsadaan warqad qiima is dhaafsi.

2. Haddii lagama maarmaan noqoto, Wasaaradaha iyo Wakaaladaha Dawladdu inay wax kala deynsadaan, deynkaasi waa inuusan dhaafin heerka miisaaniyadda ku qarriran, bixintiisuna aysan ka badnaan 45 beri.

Qodobka 7aad

Sharci kasta qodobbada sharcigaan soo horjeeda ama aan la socon karin waa la baabi'iyey.

Qodobka 8aad

Sharcigaani wuxuu dhaqan gelayaa isla markiiba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5 Oktoobar 10 1975.

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

# TALOOYIN ISGASRIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Garsooraha Maxkamadda Gobolka;

Haddu arkay dacwada hor ku qoran;

Markuu arkay wax ay ku saabsan tahay iyo digniinti Bankiga keydka iyo amahda (eeg Lam. 3284 warq.), wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;

Hadduu arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

### WUXUU CADEYNAYAA

Lumidda buugga, keydka ee Lamb. 6783, kuna qorneyd lacag dhan Shs. 14.000 (afartobankun) iskana lahaa Jaalle Maxamed Caddow Raage, sida ku cad isla warqadda Bankiga ee kor ku tilmaaman;

### WUXUUNA AMRAYAA

In loo sameeyo buug keyd cusub bedelki kii ka lumay ninka magaciisa aan horay ku soo sheegnay, 30 beri ka dib markii dekreetadan lagu shaaciyo faafinta raasmiga Dawladda;

### WAXAANA LA CODSANAYAA

In buugga la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Maxamed Caddow Raage ama qof isla asaga ka sita wakaalad Sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30ka maalmood ah ee kor lagu soo Sheegay.

Xamar Tr. 18 Oktoobar 1975.

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

*Cabdullaahi Daahir Barre*

(209)